

## PATIENT EDUCATION

# Tilmaamaha Jadwalka ee GI Melrose

### Is Diiwaangelinta

- Waxaa telefoon kuu soo diraya xafiiska diiwaan gelinta, si ay u dhameystiraan is diiwaan gelinta oo ay taas u dajajiso baaritaanka marka aad isbitaalka timaado.

### Jadwalka

- Haddii aad dooneyso **in ka noqoto balanta, fadlan naga soo wac 320-229-4933 oo dooro qabsashada balanta.** Xafiiska balamada waxa uu furan yahay Isniinta ilaa Jimcaha inta u dhaxeysa 8:00 aroornimo ilaa 4:30 galabnimo.
- Haddii aadan ku imaan karin balanta, waxaanu kaa codsaneynaa in aan na soo wargeliso 48 saac ka hor.

### Telefoonka balanta dhakhtarka ka horeeya

- Kalkaaliye caafimaad ayaa ku soo wacaya 5-7 maalmood kahor balanta baaritaanka. Wuxuu ay su'aalo kaa weydiinayaan waxyaabaha kaa caawin kara u diyaargarowga baaritaanka, waxayna kaala hadlayaan caafimaadkaaga, kaana caawinayaan inaad fahamto daawooyinka aad qaadan karto iyo kuwa aadan qaadan karin ka hor baaritaanka.
- Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan tilmaamaha qalitaanka, fadlan wac **320-256-1821** Isniinta ilaa Jimcada inta u dhaxaysa 8:00a.m iyo 4:30p.m.

### Baaritaanka ka hor

- La xiriir ceymiskaaga si aad u hubiso in ay bixinayaan kharashka baaritaanka. Kala xiriir lambarka telefoonka ee dhinaca dambe ee kaarka ceymiska.

### Macluumaadka wadaha gaariga

- Waa inuu kula socdaa wade gaari oo da'disu tahay 18 ama ka weyn marka aad dhakhtarka timaado. Haddii aadan heysan wade gaari, waxaa suuro galin balanta dib loo dhigo.
- Laguuma ogola in** aad gaarigaaga ku tagto gurigaaga. Laguuma **ogola in** aad gaari wado, tagsi ama bas aad raacdoo, ama ka tagto kaligaa Qeybta Baaritaanka jirka kaligaa.
- Taksi waad u qaadan kartaa guriga iyada oo **qof weyn** oo mas'uul ah kula socdo.
- Haddii aadan heli karin **qof gaariga kugu wada oo mas'uul ah** (qof qoyska ka tirsan ama saxiib) oo guriga ku geeyaa, baaritaankaaga waxaa la sameynayaa iyada oo aan lagu suuxin ama balanta dib ayaa loo dhigi doonaa.
- Waxaanu si adag kugula talineynaa in qof kula joogo 24 saac kadib baaritaanka sababtoo ah daawada suuxinta aaya jirkaaga saameyn ku yeelan karta, xusuustaada, iyo sida aad u gaari karto go'aan wanaagsan, oo amaan ah.
- Laguuma **ogola in** aad shaqada ku noqoto, gaari waddo, ama makiinado ku shaqeysyo maalinta baaritaanka. Ha cabin khamri hana saxiixin wax qoraal ah oo sharci ah 24 saac kadib suuxdinta.
- Ka hor inta aadan ka tagin goobta baaritaanka, calaamadaha aasaasiga ah ee jirka waa inay noqdaan kuwo caadi ah.

---

Fariin/Tilmaamo gaar ah: